

Talooyin loogu talagalay Kulanka Waalidka-Macallinka oo Guulaysta

Kulamada waalidka-macallinku waa waqtiga waalidiinta/ mas'uuliyiinta iyo macallimiintu ay wadaagaan macluumaadka, ka wada hadlaan horumarka ardayga isla markaana abuuraan xiriiro ardayda ka caawin doona in ay guuleystaan.

Waxaad wax badan ka ogtahay ardaygaaga marka la eego qofkasta oo dugsigu jooga. Macallinka ardaygaaga (ama macallimiintu) waxay doonayaan in ay war kaa maqlaan. Adiguna waxaa doonaysaa in aad war ka maqasho macallinka (macallimiinta).



Isku diyaarinta Kulamada Waalidka-Macallinka

- La hadal ilmahaaga si aad u fahamto su'aalaha/heeda iyo walwalkiisa/keeda ku saabsan dugsiga.
- Samee qoraal, adiga oo qoraaya su'aalaha iyo walwalka la qabo. Xasuusnow in aad dadka la wadaagto kartida ilmahaaga, iyo sida uu ilmahaagu hab wanaagsan wax ugu barto.
- Codso in lagula yeesho kulan telefoon haddii aadan imaan karin kulanka ilmahaaga.

Marka la Joogo Kulanka Waalidka-Macallinka

Su'aalaha loogu talagalay Macallinka:

- Sidee ayuu ilmahaygu yahay bulsho ahaan? Sidee ayaad u taageertaa horumarkiisa/keeda bulshada ee fasalka?
- Waxqabadka ilmahaygu ma gaarsiisan yahay heerka fasal? Ma i tusi kartaa tusaalooyinka shaqada ilmahayga ee xisaabta, akhriska iyo qorista oo muujinaya heerkiisa/keeda waxqabad ee hadda jira?
- Sidee ayaad u taageertaa kala duwanaanshaha awoodaha dhanka waxbarasho iyo nooca?
- Sidee ayaa dhaqanka ilmahayga looga turjumaa wakhtiga waxbarashada fasalka?
- Ilmahaygu meelna ma uga baahan yahay caawimo dheeraad ah? Maxay yihiin ilaha dugsiga laga heli karo?
- Ma haysaa wax talo soo jeedin ah si aan u sii wado waxbarashada ilmahayga ee guriga? Tusaale, buugaagta, barnaamijyada waxbarashada internet-ka, shaqada guri.
- 3 " [lo co] " Oo [o O] a OI 'So' zz 'Oo' @ -Uu' Uu' - OgO@ " O' @ Oo' O'

Kulanka ka dib

- Ilmahaaga kala hadal waxa uu macallinku kuu sheegay, gaar ahaan faallooyinka wanaagsan.
- Ka hadal hadafka la hiigsanayo isla markaana samee qorshe si aad u wada gaartaan.
- Sii wad xiriirka aad la leedahay macallinka inta lagu jiro sanad dugsiyeedka.

Adeegyada Taageero ee Ardayga

Waxbarashada Gaarka ah/504

- Sidee ayaa IEP/504 ilmahayga looga taageeraa fasalka?
- Waa maxay macluumaadka lagala xiriirayo maamulhiisa/heeda dacwadu _____ ?
- Waa maxay nidaamka wax loo qabto ee loo wada dhan yahay ee shaqeeyay?

Bartayaal Luqadda Ingiriiska

- Iyada oo laga hadlayo awoodaha waxbarashada Ingiriiska ee ilmahayga, sidee ayaad u taageertaa horumarkiisa luqaddeed iyo horumarkiisa dhanka akhriska, xisaabta iyo qorista?
- Sidee ayaa dhaqanka ilmahayga looga turjumaa wakhtiga waxbarashada fasalka?